


Tirinta iyo heesaha laxanka soo noq-noqda

Shan Daanyeer oo Yaryar

Shan daanyeer oo yaryar ayaa sariir ku boodboodayey,
Mid ayaa ka dhacay oo madaxa meel ku dhuftay,
Hooyadii ayaa dhakhtarka wacday,
Dhakhtarkii ayaa yiri,
Daanyeer dambe yuusan sariir ku boodboodin!


Afar daanyeer oo yaryar ayaa sariir ku boodboodayey,
Mid ayaa ka dhacay oo madaxa meel ku dhuftay,
...iwm.




(Sii wad ilaa aay ka dhamaadaan daanyeerada sariirta ku boodboodayey.)

Kow, laba, kabaha ii xir

Kow, laba, kabaha ii xir,
Seddex, afar, albaabka xir,
Shan, lix, qoryaha qaad,
Toddoba, siddeed, saf toosan u dhig,
Sagaal, toban, digaagadeyda buuran.



(farta ku tilmaan mar walba oo tiraahdo lambar: 1 ilaa 5 hal gacan 6 ilaa 10 gacanta kale)



Maxaa Loo Ciyaaraa?

Ciyaarta waayoaragnimo waxbarasho ayeey u tahay caruurta. Koritaanka ilmo walba ciyaarta waxay u tahay hab lagama maarmaan ah oo caalami ah. Ciyaarta waa shaqada ilmaha. Waxay u ogolaataa in ilmaha uu sahmiyo adduunka uu ku nool yahay kuna korayo.

Barnaamijyada ciyaaraha waxay siiyaan caruurta iyo dadka waaweynba fursad aay ku wada ciyaaraan deegaan amaan ah oo maskaxda ka shaqeysiya. Marka aay si wadajir ah wax-u-qabtaan, caruurta iyo dadka waaweyn mid walba midka kale howlahiisa ayaa soo jiita waxayna bartaan in aay isgaarsiin yeeshaan. Ciyaarta waxay kobcisaa koritaanka iyo wax-wadaagidda.

Qalabka caruurta ku ciyaarto waa aaladaha caruurta aay ku wanaajiyaan ciyaartooda iyo waxbarashadooda. Ma jiro hal qalab oo aay caruurta ku ciyaarto oo "sax" ah. Caruurta waxay u baahan yihiin qalab iyo sheeyo lagu ciyaaro oo noocyo kala duwan ah oo ku jaan-go'an heerka koritaankooda, daneyntooda iyo awooddooda. Waxay u baahan yihiin qalab-ciyaareed oo loogu talagalay maalmaha roobka da'ayo, kuwo loogu talagalay ciyaaraha firfircoon ee iyaga saaxiib-dood ee dibadda ah, kuwo maalmaha la xanuunsan yahay iyo qalab-ciyaareed oo lagu dhiirigeliyo wax-wadaagidda iyo wada-shaqeynta. Ka fikir baahida iyo danaha gaarka ah ee ilmahaada marka aad dooraneyso qalabk(iisa/keeda) ciyaaraha.

Waraaqaha taxanaha ah ee "Maxaa Loo Ciyaaraa" waxay talo ka bixinayaan dhaqdhaqaaqyada ciyaareed ee loogu talagalay caruurta kooxaha da'eed ee soo socda:

0-6 bilood	2-3 sanno
6-12 bilood	3-4 sanno
1-2 sanno	4-5 sanno

Sicirada dalabyada jumlada waraaqahan (pamphlets), iyo daabacaadaha kale oo dhan, waxaa laga heli karaa FRP Canada



707 - 331 rue Cooper Street, Ottawa, ON K2P 0G5

(613) 237-7667

1-866-637-7226

1-866-6-FRPCAN

(613) 237-8515

info@frp.ca

www.frp.ca

www.welcomehere.ca

www.bienvenuechezvous.ca

Somali/Somalien

Maxaa Loo Ciyaaraa?

4-5 Sanno




Ciyaarta Waa...

- bootin iyo orod
- iska -dhigidda
- fahmidda
- doorashada
- wada-shaqeynta caruurta kale
- su'aalo weydiinta
- ku ciyaaridda afka iyo lambarada
- dhibaato
- xalintaqoob-ka-ciyaaridda iyo heesidda



Qalabka-ciyaarta si taxadar ah u dooro, adigoo maskaxda ku haya heerka koritaanka ilmahaada.

Ciyaaraha koox ahaan loo ciyaaro sida nacashka iyo dhuumaaleysiga waxay baraan caruurta in aay raacaan sharci fudud. Caruurta sidoo kale waxay ku bartaan xalinta dhibaato fudud waxayna ku bartaan wadashaqeynta. Isku day barkimaha wada-shaqeynta: barkimaha goobo ahaan u saf, ilmo walba mid ugu talagalal. Caruurta waxay ku wareeganayaan barkimaha inta muusigga uu socdo. Marka muusigga uu joogsado, qof walba waa in uu barkin ku fariistaa. Hal barkin ka qaad, laakiin caruurta oo dhan ciyaarta ha sii wadaan oo muusigga biloow. Mar kale muusigga markuu istaago, caruurta qaarkood waa in aay barkin wadaagaan. Sii wad ilaa hal barkin oo WEYN aay ka harto oo caruurta oo dhan aay ku wada fariistaan.



Dhiirigeli fikirka ilmahaada adigoo u aqrinaya sheekooyin safaro xiisa badan. Ka dib isagaa siduu rabo u jili doona. U ogolow in uu barkimo, baloogyo waaweyn, sanduuqyo maran iyo go'yaal isticmaalo si uu sameeyo qalcad, gidaar gabaad ah, duur ama godka butiga (bear).

Lambaro la ciyaar ilmahaada. Waxaad tirin kartaa qeybaha qalabka lagu ciyaaro, inta talaabo aay qaadaneyso in la tago koonaha ama inta jaranjaro ee lagu gaari karo meesha laga soo sibxado ee beerta nasashada.

Ciyaarta firfircoona waxay ka caawineysaa ilmahaada in aay dhiso xoogeeda, miisaankeeda iyo isku-duwiddeeda. Kubad horey iyo gadaal ugu tuur ama ugu laad beerta nasashada dhexdeeda. Gidaar ka samee baakado, kuraas iyo tuur aay ka boodi karto, ku wareeg adigoo ordaya ama garguurasho uga xaluulo.

Ka caawi ilmahaada in uu ogaado dhawaaqa iyo xarfaha:

- U aqri buugaag sheekooyin ah oo weydii waxa uu u maleynayo in aay dhici doonaan
- U hees heeso uu garanayo oo u alif kuwo cusub.
- Ciyaaro laxan soo noq-noqda leh la ciyaar: si wada jir uga fikira erayada la laxan ah "hat."
- Tilmaan erayada uu garan garo ee ku yaala calaamadaha jidka iyo dukaamada: joogso, bixid, pizza.
- Sii xarfo birlab ku dhegan tahay oo uu ku ciyaaro; maalin walba eray cusub ku dheji qaboojiyaha, adigoo ku bilaabaya magaciisa.



Sii sheeyo uu ku sameeyo howlo farshaxanimo ah:

- maqas ilmaha aamaan u ah
- warqado midabo iyo xardhanaan kala duwan leh
- qalin qori midab leh, qalinka khadda ee midabka leh, dhabaashiir
- dun iyo kuulo waaweyn, ama macarooni, si looga sameeyo kuulo
- baakadaha cuntada laga baneeyey ku wada shuba rinji iyo xabag

Muusik isla wada sameeya:

- Sameeysta qalab muusik oo aad idinka leedihiin.
- Heesa oo ku ciyaara muusig la duubay.
- Heeso qoyskiina ku saabsan alifa.
- Saaxiibo iyo xubnaha qoyska la sameeya koox muusikeed.
- Kooxdiina cajalado ka duuba oo wada dhegeysta.

Qalabka muusigga ee guriga lagu sameeyo

Maraakas

Makarooni ceyriin ah, digir qalalan ama bariis ku shub weel maran: baakada cabitaanka, weelka caanaha dhanaan ama dhalada shaambaha. Si xoogan u xir oo furka sharooto kula nab. Waxaad ku xabageyn kartaa gacan-qabsi fandhaal ama qori lagu sameeyey.

Giitaar

Laastiko balaaran ku kala jiid wareegga baakada kabaha oo maran oo aan dabool lahayn. Laastikada jiid si aad xargaha giitaarka yeeriso.

Durbaanada

Weelasha caagga ah ee maran ama baaldiyada daba geddi oo qaadooyin qori ah ku garaac. Laba ayaad isku xiri kartaa si aad uga dhigto durbaanada boongaha gacmahana aad ugu garaacdo.

